# Faallo Kooban 31

Diseembar 2024

## Soo koobid

Shacabka ku nool Beledweyne ayaa muddooyinkii dambe ka cabanayay amni-darro ka dhalatay wada-joogitaanka dowlad-goboleedka Hirshabelle iyo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" oo iskood isu magacaabay, kuwaasoo labaduba maamullo is-garbo socda ku leh magaalada. Nidaam dowladeed oo mideysan oo maareeya amniga magaalada oo aan jirin awgeed, waxaa kordhay joogitaanka iyo dhaqdhaqaaqyada maleeshiyaadka hubeysan, iyagoo sababay dhac, isbaarooyin, iyo rabshado badan. Halganka ay labada maamul ku doonayaan in ay ku maamulaan magaalada ayaa dhaawacay kalsoonida shacabka magaalada. Hardanka u dhexeeya labada dhinac ayaa carqaladeeyay ilaha dakhli, iyadoo isbaarooyin la dhigtay duleedka magaalada, taas oo keentay koror ku yimid qiimaha badeecooyinka. Tani waxay saameyn ku yeelatay nolosha maalinlaha ah ee dadka deegaanka, gaar ahaan shaqaalaha muruq-maalka ah. Faalladan kooban waxa ay soo jeedineysaa dhowr talo oo ay kamid yihiin in odayaasha deegaanka ay hoggaamiyaan dadaallo dib-u-heshiisiin si loo xalliyo khilaafaadka dibna loo dhiso kalsoonida bulshada; in dowladda federaalka ay farageliso si ay u xakameyso maleeshiyaadka hubeysan ee dhibaataynaya magaalada, dibna usoo celiso nidaamka dowliga ah, islamarkaana wax laga qabto Macawiisleyda, iyadoo ama la ciqaabayo ama mushaar la siinayo ama hub-ka-dhigis lagu sameynayo iyadoo la barayo xirfado ay ku shaqeystaan.

### Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2024 Somali Public Agenda

## Amni-darrada Beledweyne: Xaaladda, sababaha, iyo xalka

Farxiya Maxamuud

### Hordhac

Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Federaalka Soomaaliya, oo la ansixiyay Agoosto 2012-kii, wuxuu oggolaanayaa in labo gobol ama ka badan oo ka mid ah 18-kii gobol ee ka horreeyay 1991-kii ay isku biiraan, iyagoo sameysanaya dowlad-goboleed. Gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe ayaa bishii Oktoobar 2016-kii loo sameeyay dowlad-goboleedka Hirshabeelle. Kahor sameynta Hirshabeelle, dhismaha dowlad-goboleedka ayaa wajahday diidmo ka timid gobolka Hiiraan, gaar ahaan magaalada Beledweyne. Beesha Xawaadle, iyo ugaaskoodii Ugaas Xasan Ugaas Khaliif oo geeriyooday Febraayo 2021, ayaa kasoo horjeestay habka sameynta dowlad-goboleedka, iyagoo taas beddelkeeda taageeray dhismaha dowlad-goboleed gaar ah oo loo sameeyo gobolka Hiiraan iyadoo gobolka loo kala qeybinayo labo gobol. Aragtidan waxay tixraaceysay wareegto uu soo saaray madaxweynihii hore Shariif Sheekh Axmed sanadkii 2011, kaas oo gobolka u kala qeybiyay labo gobol oo kala ah Hiiraan iyo Shabeellada Sare. Sikastaba ha ahaatee, tani kuma filneyn maadaama ay kahor imaanaysay dastuurka federaalka oo qeexaya in habka sameynta dowlad-goboleedyadu uu ku imaan karo keliya midowga labo gobol ama ka badan oo ah gobolladii jirey kahor 1991.

Inkastoo odayaasha beesha Xawaadle ay kasoo horjeesteen, madaxweynaha waxaa loo doortay Cali Cabdullaahi Cosoble, oo kasoo jeeda gobolka Hiiraan, gaar ahaan beesha Xawaadle. Kadib, wuxuu xilka ku wareejiyay madaxweyne kale, Maxamed Cabdi Waare, oo kasoo jeeda isla beeshiisa. Dhanka kale, Jowhar, oo ah caasimadda gobolka Shabeellada Dhexe, ayaa loo aqoonsaday caasimadda dowlad-goboleedka. Inkastoo magacaabista Jowhar ee caasimadda maamulka lagu qoray dastuurka dowlad-goboleedka, qoondada beesha Xawaadle ee xilka madaxweynaha wuxuu ahaa heshiis aan si rasmi ahayn loo gaaray, waxa ayna ujeedadiisu ahayd in la isku dheelitiro awood-qeybsiga labada gobol. Sikastaba ha ahaatee, heshiiskan aan rasmiga ahayn ayaanan sii socon kadib markii madaxweynaha xilka haya ee dowlad-goboleedka la doortay dhamaadkii 2020-kii. Madaxweynaha iyo caasimadda dowlad-goboleedka oo aaday hal gobol ayaa sii xoojisay cabashada ka dhex jirta deegaannada Hiiraan, gaar ahaan beesha Xawaadle.

Sanadkii 2022, dagaal ay hoggaaminayaan bulshada oo ka dhan ah al-Shabaab ayaa ka bilowday gobolka Hiiraan, iyadoo uu hoggaaminayay guddoomiyihii gobolka Hiiraan ee dowlad-goboleedka Hirshabelle Cali Jeyte Cismaan. Sanadkii 2023, xiisadaha gobolka Hiiraan ka jiray ayaa sii kordhay kadib markii xilka laga qaaday Jeyte iyadoo uu socday dagaal culus oo ka dhan ah al-Shabaab. Sidoo kale, Macawiisley uu abaabulay Jeyte ayaa helay taageero weyn, iyadoo si ballaaran loogu baahiyay guulaha ay gaarayeen warbaahinada gudaha iyo caalamka. Xilka-qaadistii Cali Jeyte ayaa dhalisay dubad-baxyo ka dhan ah Hirshabeelle, laguna taageerayo guddoomiyaha xilka laga qaaday, isagoo dowlad-goboleedka kasoo horjeestay sheegayna inuu madax ka yahay "Dowlad-goboleedka Hiiraan".

Sidaas awgeed, "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ayaa la wareegay inta badan xafiisyada dowlad-goboleedka (oo ay ku jirto xarunta maamulka gobolka Hiiraan), wuxuuna maamulka cusub billaabay canshuur uruurin, iyo amniga oo ay sugayaan macawiisleyda deegaanka. "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ayaa sidoo kale taageero u sameysay dadka fatahaadaha ay saameeyeen. Dhaqdhaqaaqyadan oo dhan ayaa "Dowlad-goboleedka Hiiraan" siiyay awood dabiici ah oo ay ku maamulaan Beledweyne ayna saameyn ugu yeeshaan deegaanno kale oo katirsan gobolka Hiiraan.

Ka sokow sii socoshada xiisada u dhexeysa dowlad-goboleedka Hirshabeelle iyo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ee is magacaabay, dagaalka ka dhanka ah al-Shabaab ayaa sii xoogeysanayay iyadoo uu hoggaaminayay Cali Jeyte. Inta lagu jiray muddadan, Cali Jeyte waxaa sidoo kale loo magacaabay Madaxa Xafiiska Madaxweynaha ee isku-dubaridka Macawiisleyda. Kadib magacaabista, Jeyte wuxuu ka gaabsaday arrimaha "Dowlad-goboleedka Hiiraan." Sikastaba ha ahaatee, labo madaxweyne (Cabdullaahi Cabdiraxmaan Aaden, oo loo yaqaan Ganey, iyo Cabduqaadir Xuseen Colow) ayaa soo if-baxay; iyagoo uu mid walba sheegtay in uu beddelay Cali Jeyte. Faalladan waxa ay labadan koox u isticmaaleysaa magaca "Dowlas-goboleedka Hiiraan" waxa ayna sidoo kale gorfeyneysaa amni-darrada ay xaaladahan ku keeneen dadka

ku nool Beledweyne iyo hareeraheeda sanadka 2024. Waxa ay sidoo kale iftiimineysaa arrimaha keenay amni-darrada hadda jirta waxa ayna ugu dambeyn soo jeedineysaa xalal.

## Dhacdooyinka amni-darro ee ugu waaweyn ee ka dhacay Beledweyne

Beledweyne waa magaalada labaad oo saameynta ugu badan ee qaraxyada iyo weerarrada al-Shabaab wajahday (Muqdisho kadib). Intaa waxaa dheer, waxaa jiray xasilooni darro siyaasadeed oo weyn, oo ay ku jiraan mudaaharaadyo iyo dilal. Isbaarooyin, dhac taleefoon, iyo boob ganacsi (oo ay badanaa la socoto jirdil mararka qaarna dil) ayaa sidoo kale aad ugu kordhay magaalada 2024.

Tan iyo 2016, diidmadii dhismaha dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Ugaaskii Xawaadle ee geeriyooday Ugaas Xasan Ugaas Khaliif, kacdoonno siyaasadeed iyo xiisado amni ayaa soo ifbaxay ee uu hoggaaminayay Generaal Abuukar Xaaji Warsame (Xuud), oo sameeyay "Dowlad-goboleedka Hiiraan" si uu u muujiyo diidmada dowladdii federaalka ee uu madaxda ka ahaa Maxamed Cabdullaahi Farmaajo. Bishii Juun 2023, mudaaharaad bulsho kale oo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ah ayaa ka dhashay Beledweyne kadib markii xilka laga qaaday Cali Jeyte oo ahaa guddoomiyaha Hirshabelle ee gobolka Hiiraan.

Inkastoo ay jireen xiisado siyaasadeed oo u dhexeeyay hoggaanka dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee Beledweyne iyo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ee is-magacaabay, haddana magaalada waxaa horay uga jiray wada-noolaansho nabdoon, taas oo suuragelisay in aanu dhiig daadan. Is-ka hor-imaadkii ugu horeeyay ee toos ah ayaa dhacay markii guddoomiyihii hore ee gobolka Hiiraan, Cabullaahi Sufurow Maalin (oo beddelay Cali Jeyte Cismaan), uu bishii Febraayo 2024 isku dayay inuu qabsado dhismaha ay degganaayeen ciidamada "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ee magaalada Beledweyne. Balse xurguftaan colaadeed ayaa muujisay xaaladaha amni-darro ee xigi doonta.

Dagaal ayaa billowday bishii Maarso 2024 kadib markii dowlad-goboleedka Hirshabeelle iyo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ay dagaallameen, kaasoo dhinacyadii dagaalamayay iyo shacabkaba uu kasoo gaaray khasaare. Hay'adaha amniga federaalka iyo ciidamada Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS) ee ku sugan Beledweyne ayaanan sameyn wax faragelin ah si ay uga fogaadaan xasaasiyadda beelaha. Ugu dambeyn, odayaasha deegaanka ayaa dhexgalay iyagoo ciidamadii Hirshabeelle u bixiyay duleedka magaalada.

Dagaalkan wuxuu dhacay markii "Dowlad-goboleedka Hiiraan" uu diiday in guddoomiyaha cusub ee gobolka Hiiraan, Muuse Salaad, uu diyaarad ku yimaado Beledweyne. Wuxuu ahaa guddoomiyihii labaad ee la magacaabay kadib markii xilka laga qaaday Cali Jeyte oo ahaa guddoomiyihii gobolka Hiiraan ee Hirshabeelle. Kadib diidmadaas, guddoomiyaha cusub ayaa Beledweyne ku yimid safar dhanka dhulka ah, kadib markii uu kasoo degay garoonka diyaaradaha ee Buulabarde.

Kadib kulankii ka dhacay degmada Mahaas bishii Maarso 2024, oo ay kasoo qeyb galeen siyaasiyiin iyo odayaal dhaqameed ka tirsan jufada Cali-Madaxweyne ee beesha Xawaadle, saameynta "Dowlad-goboleedka Hiiraan" iyo dhoola-tusyadii ay sameynayeen ayaa hoos-u-dhac ku yimid. Tani waxaa lagu fasiri karaa in "Dowlad-goboleedka Hiiraan" uu u kala qeybsamay labo garab, sidoo kale waxaa suuragal ah in dalabkooda siyaasadeed ay wiiqeen siyaasiyiin heer federaal ah oo taageersan dowlad-goboleedka Hirshabeelle. Siyaasiyiintan ayaa ka dhaadhicnayay beesha Xawaadle in ay hakiyaan tabashooyinkooda ayna u tartamaan hoggaanka Hirshabeelle ee tartanka doorasho ee xiga.

Sikastaba ha ahaatee, dambiyo tiro badan ayaa dhacay:

- Bilihii Maarso iyo Abriil ee 2024, ilaa saddex qof oo rayid ah ayaa lagu dilay dhac hubeysan. Habeenkii Ciidul Fidriga, 8-dii Abriil, haweeney ayaa la dilay kadib dagaal ka dhashay isku dhacyo u dhexeeyay ciidamo hubeysan iyo dadka deegaanka ee u istaagay in ay buuxiyaan firaaqada amni ee magaalada. Habeenkaas kahor, niman hubeysan ayaa dhacay dukaamo dhar lagu iibinayay oo magaalada dhexdeeda ku yaallay, taasoo muujisay amni-darrada dhabta ah iyo in aanan la kala saari karin ciidamada dowladda iyo kooxaha kale ee hubeysan.

- Bishii Juun 2024, amni-darrada ayaa sii xumaatay intii lagu jiray munaasabada Ciidul Adxaa, kadib markii uu dagaal hubeysan ka dhashay goob hilib lagu qeybinayay, kaasoo sababay dhimashada labo qof oo rayid ah iyo dhaawaca qof kale. Ciidamada amniga ee ku sugan albaabka ayay koox hubeysan oo aan la aqoon is-rasaaseeyeen, kadib markii ay isku dayeen in ay xoog ku galaan goobta. Dhacdadan ayaa muujineysa doorka hubka aan la xakameyn uu ku leeyahay colaadaha iyo geerida dad aan waxba galabsan.

- Bishii Ogosto 2024, bulshada ayaa si aad ah uga naxday markii la dilay mas'uul ka tirsan degmada Beledweyne, Cabdisahal Shuuriye, oo ay tuugo ku dileen howlgal dhac moobil ah. Geeridiisa waxay muujisay khataraha daran ee ay wajahayaan mas'uuliyiinta dowladda iyo rayidkaba, iyadoo telefoonnada gacanta ay sidoo kale sababi karaan dhimasho. Intaa waxaa dheer, kufsi loo geystay labo gabdhood oo ka tirsan kooxaha laga tirada badan yahay bishii Ogosto ayaa daaha ka qaaday caqabadaha bulsho iyo midda amni ee magaalada ka jirta. Xaaladdan waxay muujinaysaa in dambiyada, oo ay ku jiraan dambiyada galmada, ay yihiin natiijooyinka dagaalka iyo xasilooni darrada siyaasadeed, taasoo caadi ahaan daboosha arrimaha la xiriira xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah, iyadoo kooxaha sida dumarka iyo kooxaha laga tirada badan yahay, ay noqdaan kuwo aan la ilaalin.

- Bishii Sebteembar 2024, waxaa sidoo kale soo shaac baxay dhaqdhaqaaqyo ay maleeshiyaad hubeysan isbaaro ku dhiganayaan, taasoo ciriirisey nolosha dhaqaale ee magaalada iyagoo xiray waddada isku xerta Beledweyne iyo Matabaan. Go'aanka milkiilayaasha baabuurta ay ku gaareen in ay joojiyaan gawaarida si ay u muujiyaan culeyska ayaa ka tarjumayay culeyska ka jira waddada Beledweyne. Si ay u fuliyaan go'aankooda, milkiilayaasha gaadiidka ayaa xirtay waddada si ay u celiyaan qaar ka mid ah baabuurta aan qaadan go'aanka xayiraadda. Nasiib darro, maleeshiyadii isbaarada u taalay ayaa weerar kusoo qaaday goobihii ganacsatada si ay usoo fasaxaan gawaarida xamuulka ah ayna lacag uga qaataan. Weerarka waxaa ka dhashay hal qof oo dhimasho ah oo dhinaca maleeshiyadii isbaarada dhigatay ah.

- Darawallada baabuurta xamuulka ah baad keliya kalama aysan kulmeyn in ka badan 30 isbaaro balse waxay la kulmayeen dil iyo dhaawacyo. Saameynta isbaarooyinka iyo xayiraadda baabuurta ayaa ku fidday gobollo kale oo dalka ah, halkaas oo xoolaha iyo badeecooyinka ay ku qasban yihiin in ay isticmaalaan waddadan. Hakinta ganacsiga ee dhaqdhaqaaqa raashiinka ayaa sababay sicir barar ku yimid qiimaha cuntada iyo agabyada muhiimka ah ee Beledweyne taas oo si gaar ah u saameysay dadka muruq-maalka ah. Tani waxay sii xumeysay dhibaatooyinkii ka dhashay dhaq-dhaqaaq la'aanta lacagta shilinka Soomaaliga ah oo aan Beledweyne ka shaqeynin muddo ku dhow 7 sano. Ugaas Yuusuf Ugaas Xasan ayaa hoggaamiyay qaadista isbaarooyinka ee waddada isku xirta Beledweyne iyo Matabaan, taasoo hagaajisay dhaqdhaqaaqa iyo amniga waddada toddobaadyo dhowr ah.

- Sidoo kale, bishii Sebteembar 2024, xaaladdu waxay ka sii dartay kadib markii la dilay oday beeleed caan ah oo lagu magacaabi jiray Xasan Yare Dhegnaas, oo maalin cad si arxan daran loogu toogtay meel fagaare ah. Qaabkan oo ahaa mid ka duwan dhacdooyinkii hore waxaa sabab aan la ogeyn u dilay qof qaraabadiisa ah. Sikastaba ha ahaatee, dhacdadan waxay muujisay in sharciga iyo kala dambeynta ay ka maqan yihiin magaalada, taasoo keentay kororka dambiyada noocyadooda kala duwan. Arrintan ayaa dadka cabsi ku abuurtay iyadoo ay arkeen in xitaa dadka bulshada laga ixtiraamo aysan ka badbaadeynin rabshadaha sii kordhaya. Dilaaga waxaa gacanta kusoo dhigay booliska waxaana dil toogasho ah ku xukumay maxkamadda gobolka Hiiraan. Inkastoo qoyska marxuumka ay cafiyeen dilaaga kadib wada-xaajood dhexmaray jufada, haddana tani waxay muujinaysaa in gacanta sharciga aysan gaari karin dhammaan dambiyada, balse ay keliya dhacdooyin qaar ah gaari karaan booliska iyo nidaamka maxkamadaha.

- Dhamaadkii bishii Sebteembar, toddobo maxbuus, oo ay ku jiraan kuwo dil ku xukuman, ayaa ka baxsaday xabsiga dhexe ee Beledweyne. Tan ayaa horey u dhacday bishii Febraayo, taasoo muujinaysa tabaryarida hay'adaha amniga ee xabsiyada ku haya dambiilayaasha.

- Bishii Oktoobar 2024, wiil 7 jir ah ayaa lagu afduubtay Beledweyne. Isfaham-waa ku saabsan sii deynta cunuga kadib markii ay reerka canugga madax-furashada siiyeen afduubaha ayaa sababay geeri naxdin leh oo cunugga ku timid. Meydkiisa, oo xarig lagu xeray gacmahiisa iyo lugihiisa, ayaa laga helay webiga jiinkiisa ee agagaarka buundada Dhagax Jibis ee bartamaha magaalada. Booliska ayaa gacanta ku soo dhigay dad lagu tuhunsan yahay dilka canuggan waxayna bilaabeen baaritaan.

- 11-kii Oktoobar, magaalada ayaa mar kale la kulantay isku-dhac kale oo u dhexeeyay labada maamul kadib markii uu maamulka Hirshabeelle isku dayday in uu joojiyo dabaal-dagga 13 sano guurada "Dowlad-goboleedka Hiiraan" oo lagu qabanayay Beledweyne. Isku dhacan ayaa sababay dhimashada hal qof, waxaana sii socday xafladaha oo ka dhacday Beledweyne, Muqdisho, iyo qurbaha. Xafladdan ayaa timid dhowr maalmood kadib markii uu Hirshabelle xusay 8 sano guuradii kasoo wareegtay dhismihii dowlad-goboleedka.

- Bishii Noofembar 2024, isbaarooyinka waddooyinka ee u dhexeeya Beledweyne iyo Matabaan ayaa dib usoo cusboonaaday, waxayna isla-markiiba sababeen dhimashada darawal baabuur oo ku sugnaa waddada Saalax Jeerre. Darawalku waxaa la sheegay inuu diiday bixinta lacag yar oo $2 ahayd. Khasaaraha dhimasho ee rayidka ayaa badanaa ka dhasha sababo aad u yar yar. Sidoo kale, 15-kii Noofembar, askari hubeysan oo ku sugnaa agagaarka Suuqa Balka ee xaafadda Kooshin ayaa si xun u rasaaseeyay darawal dhalinyaro ah. Darawalka ayaa markii dambe u geeriyooday dhaawac ka soo gaaray rasaasta kadib markii uu dhiiqo ku seyriyay askariga hubeysan, taasoo keentay in uu toogto.

- Bishii Noofembar 2024, magaalada Beledweyne waxaa sidoo kale ka dhacay dhac bajaj. Arrintan ayaa kusii kordhaysay magaalada Beledweyne, iyadoo la dhacay ku dhawaad 30 bajaaj. Sare-u-kaca dhaca bajaajta ayaa sababtay in darawallada bajaajta ay is hubeeyaan si ay isku difaacaan, sidoo kalena ay kuwa kale u dhacaan si ay u aargoostaan. Inkastoo booliska degmada ay howlgallo ka sameeyeen xaafadda Buunda Weyn, iyagoo soo qabtay dhowr dhalinyaro ah, guud ahaan ammaanka magaalada ayaa sii xumaaday muddo ku dhow sanad.

- Bishii Diseembar 2024, kaalintii "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ee Beledweyne ayaa hoos u dhacday kadib markii hoggaamiyahooda uu ka baxsaday qorshe lagusoo xerayay sababo la xiriira xiriirka dhow ee uu la lahaa Itoobiya. Bishii Diseembar, Dowlad-goboleedka Hirshabelle iyo Hay'adda Nabad-sugidda & Sirdoonka Qaranka ayaa sameeyay howlgallo habeenkii ah oo wadooyinka ugu waaweyn ka socday muddo ka badan labo toddobaad si ay u xoojiyaan amniga. Sikastaba ha ahaatee, howlgalladan ma sii socon.

## Sababaha ugu weyn ee amni-darrada Beledweyne

**Maleeshiyo iyo rayid hubeysan:** Mid kamid ah sababaha ugu muhiimsan ee horseeda amni-darrada Beledweyne waa in aysan jirin xakameyn hub oo dadka rayidka dhexdooda ah. Arrintani waxaa sababay in dadka deggan gobolka Hiiraan, gaar ahaan beesha Xawaadle ay dagaal kula jireen al-Shabaab tan iyo 2022-kii. Beledweyne ayaa ahayd xuddunta isku-xirka ee laga taageerayay dagaalka. Waxaa taageeradaas kamid ahaa daaweynta dhaawacyada iyo qabashada lacagaha laga soo uruuriyey gudaha iyo dibadda si loogu maalgeliyo dagaalka.

Tallaabooyinkii is-difaaca ee la hirgeliyey intii uu soo xoogeysanayay khilaafka ayaa si ballaaran usoo bandhigtay dhaqanka hubeynta rayidka. Haysashada hubka sida AK-47 iyo bastooladaha ayaa wax caadi ah ka noqday magaalada iyo sidoo kale baadiyaha iyo tuulooyinka. Kuwa aan hubka qaadan ayaa uga qeyb-qaadanayay dagaalka in ay xogo siinayeen Macawiisleyda iyo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Kuwa kale ayaa iyagana uga qeyb-qaadanayay qeybinta cunto iyo daawo ama taageero nafsi ah oo ay u sameeyeen dagaalamayaasha Macawiisleyda. Ka qayb-qaadashada ballaaran ayaa qof kasta bartilmaameed uga dhigtay al-Shabaab, taas oo dhalisay in la isa-sii hubeeyo.

Habka is-difaaca bulshada iyo isku-xiranaanta ayaa bulshada u shaqeeysay ilaa dagaalku istaagay, kadibna ciidanka Macawiisley iyo ciidanka dowladda ayaa billaabay inay yimaadaan magaalada. Dalal badan oo ay colaado ka jiraan, waxaa dhacda in dagaalka kadib ciidamadu markay ka soo laabtaan dagaalka ay keeni karaan faa'iidooyin dhaqaale oo si kumeelgaar ah sare ugu qaada dhaqdhaqaaqa suuqa iyo socodka maaliyadda iyagoo qarashgareeya lacagahooda (White, 2004). Xaaladdan dabiiciga ah waxaa inta badan loo arkaa mid togan. Dhanka kale, ciidamada dagaalka ka soo laabta ayaa noqon kara kuwo soo jiita dareenka hay'adaha dowladda ee maamulka, maadaama saameyntooda xasilooni-darrada ay noqon karto mid cabsi leh haddii aan si habboon loo maareyn.

Sida laga ogaaday ilo maxalli ah, askarta Macawiisleyda ee Beledweyne wax lacag ah lama siin kadib dadaalkii ay la galeen al-Shabaab marka laga reebo saanad hub iyo raashiin. Tani waxay ahayd kahor inta aanay dowladda federaalka ah wax damaanad ah siin. Macawiisleeyda waxay ku qasbanaadeen inay ka tagaan xirfadahii ay nolol-maalmeedka ka heli jireen sida xoolo-dhaqashada iyo beeraha. Iyadoo aysan jirin ilo lacag laga helo oo joogto ah si ay naftooda iyo reerahooda ugu maareeyaan islamarkaana aysan jirin dagaal socda, ciidamadan ayaa kusoo laabtay magaalada. Waxa ayna billaabeen inay ka faa'iidaystaan xaaladda, iyagoo galay falal dambiyeed ay kamid yihiin dhac taleefan, iyo inay magaalada Beledweyne iyo nawaaxigeeda ka sameeyaan isbaariooyin. Iyadoo ay ugu wacantahay xaaladda kala qeybsanaanta ah iyo jiritaan la'aanta maamul hufan oo rasmi ah, Beledweyne waxa ay soo jiidatay kooxahan hubeysan oo howlgala iyagoo aanan lahayn nidaam iyo hoggaan dowladeed oo ay ka amar qaataan.

**Maamullo Is-barbar socda:** Labo maamul oo is garab socda ayaa ka shaqeeya Beledweyne. Doorka dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa ku kooban bixinta shahaadooyinka dhalashada, kormeeridda imtixaanaadka dowladda federaalka ay qaaddo, iyo maamulka maxkamadaha iyo booliska. Halka maamulka aan rasmiga ahayn ee Dowlad-goboleedka Hiiraan uu gacanta ku hayo xarumo dowladeed oo muhiim ah. Labada maamulba canshuuraha way uruuriyaan. Jiritaanka labadan maamul awgeed, waxaa soo baxday firaaq awoodeed, taas oo keentay amni-darrada sii kordhaysa iyo xaalado nolosha muwaadiniinta sii adkeynaya. Labada maamul ee Hirshabelle iyo Hiiraan State waxa uu midba midka kale ku eedeynayaa amni-darrada kam jirta magaalada.

**Jiritaan la'aanta ciidamo amni oo nidaamsan:** Maqnaashaha ciidamado amni oo nidaamsan ayaa ah caqabad kale oo weyn. Ciidamada Midowga Afrika iyo hay'adaha amniga ee federaalka ma aysan faragelin hardanka awoodeed ee gudaha Beledweyne, waxayna uga fogaadeen sababo la xiriira welwel ku saabsan xiisadaha beelaha ee sii xumaanaya. Xitaa kahor inta aan "Hiiraan State" si weyn ugu soo xoogeysan Beledweyne, ciidanka booliska Hirshabelle ayaa ahaa kuwa tiro ahaan kooban. Ciidamada booliska qaarkood ayaa ka goostay Hirshabeelle oo ku biiray "Hiiraan State" iyagoo ka carooday go'aankii ay dowlad-goboleedka Hirshabelle xilka uga xayuubiyeen Cali Jeyte, iyagoona ku andacooday in dowlad-goboleedka Hirshabelle aysan mushaar siin.

Inkastoo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" uusan ahayn hay'ad maamul oo sharci ah, haddana wuxuu ku guuleystay in uu xoogaa maareeyo amniga magaalada iyadoo uu maamulkaas tababaray ku dhawaad 500 oo ciidamo maleeshiyaad ahaa, kuwaasoo isugu jiray unugyo sirdoon iyo boolis. Joogitaanka ciidamadan ayaa si tartiib ah u baaba'ay sababo la xiriira mushaar la'aan. Kadibna, waxaa soo baxay kooxaha ilaaliya bulshada ee maxalliga ah oo ay muwaadiniin caadi ah sameeyeen si ay u hubiyaan amniga xaafadaha qaar ee habeenkii, kuwaasoo sidoo kale si degdeg ah u baaba'ay. Istaraatiijiyadda hadda ay isticmaalaan muwaadiniin badan ayaa ah is-hubeyn si ay isku difaacan.

Fashilka amni ee jira wuxuu muujinayaa qalalaasaha ka jira gudaha magaalada oo saamyn ku leh amniga dalka guud ahaan. Mid kamid ah garabyada "Hiiraan State" ayaa la kulmay dhaleecayn kadib markii uu la macaamilay wakiillo ka socday Itoobiya oo xuduudda ku sugnaa iyagoo si cad u muujiyay taageeradooda Itoobiya ee arrinka ah in ciidamo kasocda dalka Masar lagu beddelayo kuwa Itoobiya ee Hawlgalka Midowga Afrika ee Taageerada iyo Xasilinta Soomaaliya. Arrintan ayaa ka dhashay khilaafka diblumaasiyadeed ee dowladda Soomaaliya kala dhexeeyay dowladda Itoobiya kahor Baaqii Ankara ee Diseembar ee arrinkii ku saabsanaa is-afgaradkii bishii Janaayo 2024 uu Ra'iisul Wasaaraha Itoobiya la saxiixday Madaxweynihii xiligaas ee Somaliland.

## Gunaanad

Xaaladda ka jirta Beledweyne waxay muujinaysaa tabashooyin siyaasadeed iyo amni-darro is biirsaday. Xiisadaha u dhexeeya dowlad-goboleedka Hirshabelle iyo Dowlad-goboleedka Hiiraan ee iskiis isu-magacaabay ayaa sii xumeeyey amniga, taasoo dadka ka dhigtay kuwo wajahaya khasaare dhimasho iyo dhaawac ah iyo amni-darro. Kororka tirada ciidamada Macawiisleyda ee gobolka Hiiraan ayaa sidoo kale sare u qaadday dhibaatooyinka iyo hubeynta muwaadiniinta. Xaaladda Beledweyne waxa ay muujineysaa caqabado kala duwan. Ma aha mudnaan keliya abaabulka dadka deegaanka ee is-difaacidda, balse sidoo kale waxaa muhiim ah in la hubiyo in ciidamadaas ay ka hawlgalaan deegaan ay siyaasaddiisa xasiloon tahay. Saameynta ka dhalatay hubka sharci-darrada ah oo ay dad badan heystaan iyo hubka oo aan la xakameyn ayaa dadka Beledweyne ka dhigtay kuwo u nugul khasaare dhimasho iyo dhaawac iyo cabsi. Sidaas awgeed, faalladan waxa ay daneeyeyaasha kala ah dowladda federaalka Soomaaliya, dowlad-goboleedka Hirshabeelle iyo Hiiraan State iyo bulshada gobolka Hiiraan u soo jeedinaysaa dhowr talo oo tixgelin mudan si xal waara loo helo.

## Talooyin tixgelin mudan

**Dhaxalka iyo hoggaaminta Macawiisleyda:** Naf-hurnimada dagaalamayaasha Macawiisleyda Xawaadle ee dagaalka al-Shabaab la galay 2022-kii waa in aan lagu suurad-xumeyn ku-lug-lahaanshaha nabad-gelyo darrada ka jirta bulshadii ay u dagaalameen si ay u difaacaan. Ilaalinta dhaxalka halgankan waxa uu u yaallaa odayaasha beesha oo uu ugu horreeyo Ugaas Yuusuf Ugaas Xasan oo qaaday tallaabadii ugu horeysay ee lagu qaadayo isbaarooyinka iyo jilayaasha kale ee muhiimka ah. Waa lama-huraan in la helo xal kama dambeys ah lana ciribtiro isbaarooyinka. Dadaal lamid ah midkaas ayaa loo baahan yahay in laga sameeyo magaalada si loo joojiyo dilalka iyo dhaca. Mar haddii Macawiisleyda lagu soo abaabulay qaab qabiil, taasi waxay ka dhigan tahay in odayaasha dhaqanka laga doonayo in ay qaadaan tallaabooyin ay ka mid yihiin in magaalada dhexdeeda hubka laga mamnuuco. Sikastaba ha ahaatee, waxaa lama huraan ah gacan dowladeed si loo fuliyo. Si loo sameeyo hub-ka-dhigis, dowladdu waxay hiigsan kartaa in ay hindise shaqo abuur ah iyo fursado tababar xirfadeed ee muddada fog ah ay siiso maleeshiyaadka.

**Baahida loo qabo faragelin dowladda federaalka ah:** Dib-ugu-noqoshada qaabkii howlgalka Macawiisleyda ayaa muhiim ah si looga hortago in meelo kale oo wadanka ka mid ah ay ka dhacaan natiijooyin taban iyo in la hubiyo in ciidamadani ay sii ahaanayaan cudud diyaar ah oo looga hortago colaadaha mustaqbalka ee aysan noqon culeys. Dowladdu waxay ciidamadaas u baahan tahay dagaallada mustaqbalka dhici kara, sidoo kale in militariga ay ka mid noqdaan waxa ay meesha ka saari kartaa ka mid ahaanshahooda rayidka. Sidaas darteed, dowladdu waxay dardargelin kartaa doorka madaxa Macawiisleyda iyadoo diiwaan-gelinaysa magacyadooda iyo hubka ay haystaan. Waxa kale oo la siin karaa gunnooyin bille ah si ay isugu maareeyaan ka hor dagaal kale iyo/ama ilaa ay si buuxda uga mid noqonayaan bulshada. Taas macneheedu waa in loo baahan yahay qorshe iyo istaraatiijiyad cad oo looga faa'iidaysto ciidamada Macawiisleyda inta lagu jiro dagaallada iyo muddada u dhexeysa dagaallada. Abaabulka iyo nidaaminta odayaasha ayaa lama huraan ah si looga fogaado fasiraadda khaldan ee qabyaaladda. Joogitaan xooggan ee dowladda federaalka ayaa sidoo kale muhiimad weyn u leh xuduudaha gobolka Hiiraan ay la wadaagto Itoobiya, iyadoo la xaddidayo saameynta uu dalkaas ku yeelanayo arrimaha gobolka.

**Baahida loo qabo boolis deegaanka ah:** Khilaafka aan la xallin ee u dhexeeya dowlad-goboleedka Hirshabeelle iyo "Dowlad-goboleedka Hiiraan" waxay halis ku noqdeen himilooyinka ballaaran ee federaaleynta iyo maamul daadejinta, kuwaas oo ah tiirar muhiim u ah dadaallada Soomaaliya ay ugu jirto dhismaha hay'ado dowladeed oo ka shaqeeya danta guud. Si taas loo soo celiyo, booliiska ama ciidamada booliska ee aan rasmiga ahayn ee Beledweyne ku sugan waxa ay lama huraan u yihiin soo celinta nabadda iyo kala dambeynta. Tallaabadan waxa ay waxtar badan yeelan kartaa kadib marka heshiis siyaasadeed la gaaro.

**Xalal ku saleysan baahida deegaanka:** Ilaalada deegaanka ee ay abuurtay "Dowlad-goboleedka Hiiraan" ma aanu noqon mid waara oo si degdeg ah ayay ku burbureen. Tani waxay muujinaysaa in jilayaasha aan dowliga ahayn ay awood xaddidan ku leeyihiin xallinta dhibaatooyinka iyo ka jawaabista baahiyaha muwaadiniinta. Marka jilayaasha dowliga ah sida dowlad-goboleedka Hirshabeelle aysan sharciyad buuxda ka heysanin qaar kamid ah deegaannada laga soo doortay, waxa ay iyaduna keenaysaa khilaaf. Haddaba, dadaalka ugu horreeya uguna muhiimsan waa la isugu geeyo sida loo xalinayo tabashada siyaasadeed ee ay beesha Xawaadle ka qabto dowlad-goboleedka Hirshabeelle.

**Ka gudbidda siyaasad faa'iido laga raadiyo:** Inkastoo beesha Xawaadle ay saluug ka qabto dhismaha dowlad-goboleedka Hirshabeelle, haddana waxaa xusid mudan in madaxda "Hiiraan State" aanay sameynin isku dayo ay ku xallinayaan cabashooyinkaas. Taas beddelkeeda, waxay dano gaar ah u adeegsadaan qanaaca la'aanta dadweynaha. Beesha Xawaadle oo ay ku jiraan qurbajoogta oo dhaqaale ku bixiya dhaq-dhaqaaqyada siyaasadda gudaha, iyo waxgaradka gobolkaas ayaa looga baahan yahay inay si dhab ah uga doodaan doorarka kala duwan ay siyaasiyiintu ciyaaraan, halka dadku ay la noolyihiin dhibaatadii ka dhalatay amni darrada iyo horumar la'aanta.

**In dib-u-heshiisiin mudnaanta la siiyo:** in lagu guul dareystay xalinta cabashooyinkii ka dhashay dhismihii dowlad-goboleedka Hirshabeelle ayaa horseeday horumar la'aan, waana in aan arrinkaa lagu soo celin doorashada hoggaanka Hirshabeelle ee mustaqbalka. Dhismaha dowlad-goboleedka Hirshabeelle ee 2016-kii iyo sidoo kale isbeddelkii dhacay 2020-kii waxaa saameeyay doorashooyinka federaalka. Doorasho deg-deg lagu qabtay ayaa siddeed sano oo horumar la'aan iyo maamul xumo ah u horseedday bulshooyinka ku dhaqan dowlad-goboleedka Hirshabeelle, gaar ahaan gobolka Hiiraan. Waxaa lama huraan ah in afarta ilaa shanta sano ee soo socota aan la khasaarin iyadoo aan la xallin sababta aas-aaska u ah dhibaatadan. Dib-u-heshiisiin bulsho iyo mid siyaasadeed ayaa muhiim ah kahor inta aan la qaban doorasho kale oo heer dowlad-goboleed ama federaal ah. Tani waxay ka dhigan tahay madaxweynaha dowlad-goboleedka Hirshabeelle in uu beesha Xawaadle ka yimaado aanay xallin doonin xaaladda jirta, maadaama aanay horey u xalin.

**Dib-u-heshiisiin uu Ugaasku hormuud ka yahay:** Ugaaska Xawaadle waxa uu hoggaamin karaa howlo dib-u-heshiisiin oo beesha Xawaadle dhexdeeda ah. Waxa uu ka shaqeyn karaa soo celinta kalsoonida bulshada isaga oo garwaaqsanaya khasaaraha dhimasho iyo dhaawac iyo dambiyada laga galay bulshada. Raaligelin dadweyne iyo u naxariisashada kuwa ay amni-darrada saameeysay waxay booga-dhayi kartaa cabashooyinkooda kahor inta aan la billaabin dib-u-heshiisiin heer sare ah. Sidoo kale, in Ugaaska iyo odayaasha beelaha kale dib-u-heshiisiinta laga qeyb-geliyo waxay sharciyad siineysaa dowlad-goboleedka Hirshabeelle. Odayaasha ayaa ah daneeyeyaal mug leh oo kaalin muhiim ah ka ciyaari kara arrimaha siyaasadda. Ugaaska Xawaadle ayaa heysta aqbalaad bulsho oo ballaaran. Sidaas awgeed, waa muhiim in laga qeyb-galiyo si dib-u-heshiisiin miro dhal ah loo gaaro. Sidoo kale, waa in beelaha kale ee aan ahayn Xawaadle ee dega gobolka Hiiraan ay ka shaqeeyaan sidii ay labada dhinac isugu soo dhaweyn lahaayeen, ayna noqdaan kuwo si firfircoon uga qeybqaata dib-u-heshiisiinta.

## Tixraac

White, J. B., 2004. Recruiting Bonus, Retention Onus: The GI Bill. Military Review, Volume 84.

**Somali Public Agenda**

Muqdisho Soomaaliya

+252(0)85 8358

info@somalipublicagenda.org

<https://www.somalipublicagenda.org>

@somalipubagenda